

Kusoo tamashlaynta barafka-Fasaxa cayaaraha waa wax dadka oo dhan ka dhaxeeya!

Waa xilligii jiilaalka, fasaxii sportigana waa soo dhawyahay. Waxaa jirta fursad aad inta aad doontid aad ku joogi karto bannaanka – dadka waawayn iyo carruurta.

In la dhaq dhaqaaqo waa wax u fiican qof walba. Xataa haddii baraf da'ayo oo ay qabowdahay-waana wax u wanaagsan jirka iyo naftaba. Maah maah iswiidhish ah baa oranaysa "Hawo xuni ma jirtee, ee waxaa jira dhar xun"

Hadda iftiinkii qorraxda baa maalin walba sii kordhaya, iyadoo barafka dhulkana sii kordhinaayo iftiinka. Waddamada cirifka waqooyi ku yaal waxaa ku yar qorraxda, oo waa in dibadda loo baxaa si maqaarka jirku u helo falaaraha qorraxda ee loo yaqaan UV. Sidaa darteed waa in la qaataa fitimiin –D-ga. Kaas oo naga difaaca lafaha jirka oo jilca iyo cuduro kaleba. Qof yar iyo qof weynba waa in aan dibbadda u baxnaa, oo aan ilaalinaa caafimaadkeena. Dadka waaweyn waxaa ku filan ugu yaraan 30 daqiiqo oo socod ah maalin walba! Taasi waxay yareynaysaa cudurada ku dhaca wadnaha, kansarka iyo kuwa dhimirka. Hurdadana wey fududeysaa. Maadaama dhulku uu dadka la siibanayo , waxaa fiican in kabaha hoos looga xirto xargaha sin biririxada celiya, waxaad ka gadan kartaa tusaale ahaan farmashiga, oo waxay kaa celinayaan siibashada. Degmooyinka gobolka qaarkood waxay ugu deeqaan qalabkaas celiya kufidda dadka ka weyn 65 sano. *Wac degmadaada oo waydiiso!*

Degmooyinka qaarkood waxay amaahiyaan qalabka cayaarta xilliga firaqada. Sida kabaha

barafka lagu ordo, ulaha barafka, iyo koofiyadaha adag ee madaxa ka ilaaliya dhaawaca haddaad dhacdo. *Wac degmadaada oo waydiiso!*

Khatarta isqaadsiinta oo kordhi karaysa fasaxa sprotiga ka dib.

Hadda wey yaraadeen dadkii loo keenayey cusbitaalada gobolka cudurka Karoonaha (covid-19),laakiin weli, dhakhtaradda cudurada faafa Lisa Labbé Sandelin, wey wel wel santahay.

Oo waxay leedahay rogaal celis sadexaad oo cudurka Karoonaha ah baa suurto gal ah, haddii dad badani safraan xilliga fasaxa ah kuwaas oo cudurka soo qaadi kara. Sidaa daraadeed kuwa safraya waa iney taxadaraan. Waa in lalaa socdaa oo keliya dad yar oo aad horey isula socon jirteen. Waa inaan lala kulmin dadkale oo kugu cusub.

Waana in la racaa talooyinka cudurka leysaga ilaaliyo, lana sii kordhiyaa nadaafadda. Marka hore: Guriga dibadda uga bax inta aad kartid-laakiin hala kulmin dad cusub. Raac talooyinka cudurka leysaga ilaaliyo, kordhi nadaafaddana.

HADDA: oo ku beegan 12-ka febraayo waxaa gobolka Kalmar la talaalay dad dhan 13 252 qof!

Fasaxa cayaaraha/isboortiga

Fasaxaan la yiraahdo fasaxa cayaaraha waxa uu iswiidhan ka jiray ilaa iyo 1940-kii. Markaa waxaa la dhihi jiray fasaxii kuleylinta. Qabowga oo badnaa xiliga jiilaalka waxaa qaali ahayd kuleylinta iskuulada.

Si markaa fasaxaasi macno ugu yeesho ilmaha iyo da'yarta waxaa la qaban qaabin jiray cayaara badan oo barafka dushiisa lagu cayaaro, dad badanna meelaha buuraleyda ah ayey aadi jireen.

Maanta fasaxan isku mar waddanka oo idil lagama galo, waxaa loo qaybiyaa inuu bilowdo laga bilaabo wiiga 7-aad ilaa wiiga 10-aad ee sanadka. Gobolkeena Kalmar waxaan galeynaa wiiga 8-aad.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka , hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhax dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar

Kalmar kommun

